



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA
KU SAABSAN
HIIGSIGA 2016.

GOLAHA SHACABKU:

- Markuu Arkay:** Qaraarka Lr. GSH/23/15 ee 16/9/2015;
- Markuu Arkay:** War Murtiyeedkii ka soo baxay Madasha oo ku taariikhsan 16^{kii} Diseembar 2015;
- Fiiro u Yeeshay:** Inay kala qaaran yihiin talooyinka kasoo baxay la tashiga dadweynaha oo aad u kala fog;
- Markuu Dhageystay:** Qiimeynta Xildhibaanada Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ku sameeyeen soojeedimaha Ergooyinka Madasha Wadatashiga, iyo talooyinkii uu soo jeediyey Guddiga Farsamada ee soo siiqeeyey aragtida Xildhibaanada;
- Tixgeliyey:** In loo baahan yahay in la jiheeyo Nidaam-siyaasadeedka looga gudbi lahaa laguna keeni lahaa Baarlamaanka 10aad ee Soomaaliya.

Wuxuu soo saaray Qaraarkan.

Talo kasta oo laysla meeldhigo waa in ay waafaqsan tahay shuruudaha hoos ku qoran:

1. Ineyn wax u dhimin midnimada Qaranka, iyo wadajirka Shacabka Soomaaliyeed,
2. Ineyn keenin xasilooni darro siyaasadeed iyo mid amni oo dalka u horseedi karta colaado cusub,
3. Waa iney waafaqsan tahay Dastuurka JFS sida ku cad Qodobka 4^{aad} Faqradda 1^{aad} oo sheegaya:


“Shareecada ka sokow, Dastuurka JF Soomaaliya waa Shacbiga dalka ugu sarreeya, isaga ayaana Xakuumaddu u hogaansameysaa, wuxuu hagayaa hal abuurka iyo go’aammada siyaasadeed ee qaybaha Dawladda oo dhan”

ama la soo waafajiyaa Dastuurka ayadoo la soo marayo hay’adaha Dastuuriga Qaranka ah oo ay khuseyso.

4. Si loo ilaaliyo xuquuqda iyo sinnaanta ka qaybgalka siyaasadeed ee muwaadiniinta Soomaaliyeed, loogana fogaado in danta gaarka ahi kumilanto danta caamka ah, talooyinka go'aan qaadashada ah ee Baarlamaanka 10aad JF Soomaaliyeed ku imaanayo qayb kama noqon karaan dad u sharaxan doorashada jagooyinka sare ee Qaranka.
5. Maadaama Baarlamaanka 9aad waajibkiisa ka mid tahay dib-u-eegista Dastuurka JFS sida ku cad Qodobka 136^{aad} Faqradda 1^{aad}:

"Inta lagu gudajiro muddo xileedka 1aad ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, Baarlamaanka Federaalka wuxuu qaadan doonaa wax ka badalka lasoo jeediyay ee Dastuurka Ku-meel-gaarka ah kaliya intii lagaga ansixiyay kadib cod kama dambays ah Aqalka Shacabka codkaas oo u dhigma Saddex meelood Laba meel (2/3), iyo codka kama danbeyska ah oo ay u qaadaan Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ah, codkaas oo ugu yaraan ah Saddex meelood Laba meel (2/3) xubnaha jira"

Golaha Shacabka Soomaaliyeed waxay u soo jeedinayaa Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee JF Soomaaliyeed in uu si hortabin leh u soo gudbiyo Shintiriska dib-u-eegista Dastuurka si waafaqsan qodobkan.


M. ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

